LOOGU TALOGALAY MAGANGELYO DOONKA

Foto: Scandinav Bildbyrå/Jörgen Wiklund

Sidan ayaad samaynaysaa haddii aad u baahato daryeel caafimaad ama daryeelka ilkaha

REGION JÄMTLAND HÄRJEDALEN

SOMALISKA

XARUNTA CAAFIMAADKA — HADDII AANAD AAD U XANUUSANAYN AMA U DHAAWACNAYN

Haddii ay ku haysato dhibaato taas oo aan u baahnayn daryeel deg-deg ah oo isbitaal markaasi waxad caawimaad ka raadsanaysaa xarumaha caafimaadka. Xarumaha caafimaadku waxay furanyihiin inta u dhaxaysa saacada 08.00 iyo 17.00, dhammaan maalmaha shaqada. Si loo yimaado halkaasi waa inaad la hadashid oo ballansatid wakhti.

Macluumaadka xidhiidh ee xarumaha caafimaadka:

1177 HAGIDA DARYEELKA — HADDII AAD U BAAHANTAHAY TALO KU SAABSAN CAAFIMAADKA

Haddii aad wacdo lambarka telafoonka ee 1177 waxad la hadlaysaa kalkaaliso caafimaad oo telafoonka ah. Kalkaalisada caafimaad ee telafoonka waxay ka jawaabi kartaa su'aalo, ku siinaysaa talo, qiimeyneysaa haddii aad u baahantahay daryeel iyo haddii arrinti sidaas tahay kuu tilmaamaysaa wixi intaas dheer. Waxa aad wici kartaa 1177 xilliga aad doonto ee maalinti iyo habeenkiba. Waxa jirta fursada in la hadlo iyadoo la adeegsanayo turjubaan. Waxa aad xitaa talo ka heli kartaa internet-ka. Dhinaca www.1177.se waxa ku jira qoraalo ku saabsan cudurrada, dhibaatooyinka, baaritaanada iyo daaweynta. Qaar ka mid ah qoraaladan waxay ku turjubanyihiin luqado kala duwan.

QAABILAADA DEG-DEGA AH — HADDII AAD U XANUUSATID AMA U DHAAWACANTAHAY

Haddii si kedis ah uu kugu dhaco xanuun aad u dhib badan ama aad ku dhaawacantid shil waa inaad tagtid qaabilaada deg-dega ee isbitaalka Östersund. Qaabilaada deg-dega ah waxay furantahay maalinti iyo habeenkiiba, maalmaha oo dhan.

Haddii lagu dhigo isbitaalka Östersund markaasi waxa aad muhiim u ah in adiga ama qof ka mid ah shaqaaluhu ay wargeliyaan Hey'ada Socdaalka ee Östersund. Hey'ada Socdaalka waxay leedahay telafoon lambarka 010-485 54 18.

DARYEELKA ILKAHA — HADDII AAD LEEDAHAY XANUUN ILKAHA AH

Carruurta magangelyo-doonka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan daryeelka ilkaha, si la mid ah sida carruurta kale ee jooga Iswiidhan. Waxad carruur tahay haddii aanad buuxin 18 sanno.

Magangelyo-doonka dadka waaweyn ah waxay xaq u leeyihiin oo keliya daryeelka ilkaha ee deg-dega ah. Taas oo ah haddii la leeyahay xummad, barar, xanuun iyo jug ku dhacday (haddii qofka ay garaacid kaga dhacday afka).

Carruurta waxa si iskeed ah looga yeedhaa Daryeelka Ilkaha si baaritaano looga sameeyo meesha ilmuhu deganyahay. Haddii ilmuhu u baahanyahay daryeelka ilkaha ee deg-dega ah waxa lala hadlaa Daryeelka Ilkaha lambarkooda heeganka, 063-15 33 00.

Xitaa dadka waaweyn ee u baahan daryeelka ilkaha ee deg-dega ah waxay la hadlayaan Daryeelka Ilkaha lambarkooda heeganka. Waa in mar kastaba lala hadlo oo wakhti la ballansado ka hor intaan la iman daryeelka ilkaha ee deg-dega ah.

XUQUUQDA DARYEELKA BUKAANKA IYO DARYEELKA ILKAHA

Carruurta magangelyo-doonka (ka yar 18 sanno) waxay xaq u leeyihiin daryeelka bukaanka iyo daryeelka ilkaha ee ay u baahanyihiin oo ah shuruudo la mid ah sida carruurta kale ee deggan gudaha Iswiidhan.

Magangelyo-doonka dadka waaweyn ah (ka weyn 18 sanno) waxay xaq u leeyihiin daryeelka bukaanka ee deg-dega, daryeelka ilkaha ee deg-dega, daryeelka hooyada, daryeelka ummulida, talo-bixinta qalabka loo adeegsado ka hortaga uureysiga, ilmo soo ridid, daryeelka sida ku xusan sharciga ka ilaalinta faafinta iyo daryeelka aan la sugi karin.

Xusuusnow in mar kasta ay khasab tahay inaad tusto caddaynta magangelyada ama kaadhka LMA marka aad caawimo ka helaysid daryeelka bukaanka iyo ilkaha iyo marka aad iibsanayso dawooyinka dhakhtar qoray.

BAARITAANKA CAAFIMAAD

Dhammaan magangelyo-doonka waxay xaq u leeyihiin inay helaan baaritaan caafimaad oo bilaash ah. Isticmaal fursadan.

TURJUBAAN

Waxad goor kasta xaq u leedahay turjubaan marka aad xidhiidh la leedahay daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha. Haddii aad ballan ku leedahay xarunta caafimaadka, isbitaalka ama daryeelka ilkaha, waxa muhiim ah inaad ku timaadid wakhtigeeda maadaama turjubaan loo ballamiyay booqashadaada.

KHARASHYADA BOOQASHADA DARYEELKA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA ILKAHA

Carruurta iyo dhallinyarada aan buuxin 20 sanno waxay helayaan daryeel caafimaad oo bilaash ah.

Dadka buuxiyay 20 sanno waxay bixinayaan:

- 25 karoon booqashada xagga kalkaalisada caafimaad ee degmada ee xarun caafimaad
- 50 karoon booqashada xagga dhaktar ah xarun caafimaad
- 50 karoon booqashada isbitaalka qaabilaadiisa deg-dega ah, haddii qofku marka horre tagey xarunta caafimaadka oo helay warqada u gudbinta isbitaal ama daryeel gaar ah. Haddii qofku aanu haysan warqada u gudbinta isbitaal ama daryeel gaar ah waxa kharashka booqashada ee qaabilaada deg-dega ah waa 300 kr.

Carruurta iyo dhallinyarada magangelyo raadiska ah waxay heli karaan daryeel ilko oo bilaash ah. Tani waxay shaqaynaysaa ilaa qofku buuxiyo 18 sanno. Dadka waaweyn ee buuxiyay 18 sanno ee magangelyo raadiska ah waxay heli karaan daryeelka ilkaha deg-dega ah xilliga xummad, barar, xanuun iyo jug ku dhacday (haddii qofka ay garaacid kaga dhacday afka). Hal booqasho kharaskeedu waa 50 karoon.

HADDII AAD UUR YEELATO

La xidhiidh xarunta caafimaad sida ugu dhakhsaha badan ee aad ogaato inaad uur leedahay. Waxad xaq u leedahay inaad hesho baaritaano joogto ah lana yeelato ummuliso. Haddii loo baahdo waxa aad xitaa la xidhiidhaysaa dhakhtar. Waxa kale oo aad helaysaa macluumaad ka hor ummulida, daryeel xilliga ummulida ah iyo baaritaanada adiga iyo ilmaha ka dib ummulida. Waxa kale oo aad helaysaa talo-bixin ku saabsan qalabka loo adeegsado ka hortaga uureysiga. Daryeelka halkan uma baahnid inaad ka bixiso wax kharash ah.

ILMO SOO RIDID

Marka loo eego sharciga Iswiidhishka haweenayda qof-ahaanteeda ayaa go'aaminaysa haddii ay doonayso in ilmaha laga soo rido iyo in kale. Haweenka doonaya talo-bixin ku saabsan ilmo soo ridida waa inay wakhti ka ballansadaan Qaabilaada Ilmo Soo Ridida ee Östersund isbitaalkeeda. Waxa halkaas ka jira laba telafoon lambar:

Ka 063-15 39 30 waxad wici kartaa isniinaha, salaasooyinka iyo arbacooyinka, inta u dhaxaysa saacada 08.00 iyo 09.00.

Ka 063-15 35 93 waxad wici kartaa khamiisaha iyo jimcaha, inta u dhaxaysa saacada 08.00 iyo 09.00.

SAFAR

Adiga qof ahaantaada ayaa dabaranaya gaadiidka tegitaanka iyo ka imaatinka daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha. Haddii shaqaalaha caafimaadku ay u arkaan inaad aad u xanuusanayso una baahantahay taas baddelkeda raacida taksi, markaasi waxay qorayaan caddayn oo kuu dalbayaan taksi. Safarkan kharashkiisu waa 40 karoon. Adigu waxad bixinta kharashkan siinaysaa wadaha taksiga ka hor intaanu safarku bilaabmin.

DAWO

Haddii aad u baahantahay dawo waxad ka iibsanaysaa farmasiga uu dhakhtarkaagu go'aamiyay. Haddii aad heshay warqada dawada ee dhakhtarku qoro oo aad marka aad dawada soo qaadanayso tusto kaadhkaaga LMA waxad bixinaysaa ugu badnaan 50 karoon. Haddii aad iibsato dawo aan ahayn ta lagu iibsado warqad dhakhtar qoray waxad bixinaysaa qiimaha dawadan caadi ahaan uu yahay kharashkeedu.

XAQA MAGDHABID

Keydi dhammaan waraaqaha caddaynta ee kharashka lagu bixiyo ee aad hesho marka aad booqato daryeelka bukaanka ama daryeelka ilkaha, iibsato dawo ah ta lagu iibsado warqad dhakhtar qoray iyo samaynta safarada bukaanka. Haddii aad adigu, gudaha wakhti ah lix bilood, aad bixisay wax ka badan 400 karoon markaasi waxad kaalmo gaar ah ka codsan kartaa Hey'ada Socdaalka. Waxad helaysaa magdhabida kharashyada ka badan 400 karoon. Ma bixisay tusaale ahaan 600 karoon markaasi waxad helaysaa 200 karoon oo magdhow ah.

REGION JÄMTLAND HÄRJEDALEN